Skolverket

Ku socota
ardayda dhigta fasalka 9 ee dugsiga hoose-dhexe
ama fasalka 10 ee dugsiga gaarka ah

Imtixaan qaran

Waa la idin salaamay!

Waxaad u heleysaa warqaddan iyadoo ay sababtu tahay in inta sannad dugsiyeedkan lagu jiro aad sameyn doontid imtixaan qaran oo ku aaddan swiidhishka iyo swiidhishka luqad labaad ahaanta ah, ingiriis, xisaab iyo mid ka mid ah maddooyinka bayoolojiga, fiisikiska ama kimistariga iyo mid ka mid ah maddooyinka joqoraafiga, taariikhda, cilmiga diimaha ama cilmiga bulshada.

Ula jeeddada laga leeyahay imtixaannada qaran waa in macallinkaagu uu taageero u helo sidii uu aqoontaada u qiimeyn lahaa. Waa manhajka waxbarashada ee maaddooyinka kala duduwan halka laga duulayo marka waxa uu imtixaanku ka koobnaanayo iyo qaabkiisa la go'aaminayo. Natiijadaada ku aaddan imtixaanka qaran waa qeyb ka mid ah qiimeynta la ururiyay ee keeneysa in aad heshid shahaaddada kama dambeysta ah ee ugu caadilsan ee suurta galka ah.

Imtixaanka waxaa lagu hormariyaa, laguna diyaariyaa dhowr ka mid ah jaamacadaha waddanka oo ay Hey'adda dugsiyadu u xil saartay. Macluumaadka imtixaanka ku jira waxaa lagu tijaabiyay dugsiyo fara badan oo kala duduwan oo waddanka oo dhan ku faafsan. Arday iyo macallimiin ayaa ka dhiibtay aragtiyo la tixgeliyay markii imtixaanka la soo saarayay.

Macallimintaada maaddo walba goonideeda ah ayaa kugu wargelin doona waqtiga imtixaanku dhacayo, qiimeynta iyo wixii kale ee imtixaanka taabanaya.

Swiidhishka iyo swiidhishka luqad labaad ahaanta ah

Imtixaanka qaranka ee swiidhishka iyo swiidhishka luqad labaad ahaantu waxay ka koobanyihiin seddax qeybood.

Imtixaan qeybeedka A waa imtixaan afka ah oo seddax qeybood laguugu qiimeynayo: in aad wax ay wax ka koobanyihiin soo bandhigtid, in aad wada hadal hogaamisid iyo in aad wadahadal ka qeyb gashid. Qoraal gaaban, sawir ama qeyb yar oo filin ka mid ah ayaa xagga wax soo bandhigidda iyo wada hadalka xiga laga bar tiireynayaa. Imtixaan *qeybeedka B*, waa in aad ku muujisaa awooddaada ku aaddan in aad akhrisid nuucyo kala duduwan oo qoraallo ah. Maalinta imtixaanka waxaa lagu siinayaa warqad qoraal ah iyo ku dhawaad 20 su'aalood oo ku aaddan qoraallada warqadda ku qoran. Waxaad ka billaabeysaa in aad marka hore akhrisid warqadda qoraalka ah, dabadeedna waxaa lagu siinayaa su'aalaha. *Imtixaan qeybeedka C* wuxuu tijaabinayaa awooddaada ku aaddan in aad wax ka qortid maaddo laga cayimay. Waxaa lagu siinayaa seddax shaqo-hawleed oo aad kala dooran kartid.

Skolverket

Ingiriis

Imtixaanka qaranka ee ingiriiska waxaad ku muujineysaa awooddaada ku aaddan in aad ingiriiska ku adeegsatid qoraal iyo hadal ahaan iyo in aad fahamtid ingiriiska aad maqleysid iyo kan aad akhrineysid. *Imtixaan qeybeedka A* waa mid afka ah oo aad ku muujineysid awooddaada ku hadlidda iyo ku wada sheekeysiga. Imtixaan *qeybeedka B* waxaad wax walba ka hor muujineysaa awooddaada xagga akhriska iyo fahmidda iyo dhegeysashada iyo fahmidda. *Imtixaan qeybeedka C* waa mid qoraal ah, halkaas oo aad ku muujineysid awooddaada ah in aad qoraal is heysta ingiriis ku qortid.

Xisaab

Imtixaanka qaranka ee xisaabtu wuxuu ka koobanyahay afar imtixaan qeybeed. *Imtixaan qeybeed A* wuxuu tijaabinayaa awooddaada ku aaddan in aad la socotid iyo in aad af ahaan ku soo bandhigtid dood xisaab la xiriirta. Waxaad sidoo kale fursad u heleysaa in aad eegtid sharraxaadaha iyo doodaha dadka kale.

Imtixaan qeybeedka B wuxuu ka koobanyahay hawlo shaqo oo la xallinayo iyadoo aan la adeegsaneynin waxyaabo dijitaal ah iyo warqado qawaacid ah. Qaar hawlaha shaqo ka mid waxaad soo bandhigeysaa sida aad u xallisay, kuwa kalana waxaad ka bixineysaa oo keliya jawaab. *Imtixaan qeybeedka C* wuxuu ka koobanyahay shaqo hawleed ka ballaaran oo leh hannaan baaritaan halkaas oo aad xalkaaga ku soo bandhigeysid. *Imtixaan qeybeedka D* wuxuu ka koobanyahay shaqo hawleedyo fara badan halkaas oo aad ku soo bandhigeysid siyaabaha aad wax u xallisay. Shaqo hawleedyada badankooda waxaa leysugu ururiyay hal mowduuc.

Bayooloji, fiisikis ama kimisteri

Dhammaan ardayda dugsigaagu waxay imtixaan qaran ku sameynayaan isku maaddooyin. Imtixaanka dugsigaaga lagu sameynayo waxa uu yahay waxaad ogaaneysaa ku dhawaad seddax usbuuc ka hor waqtiga imtixaanka.

Imtixaan qeybeedka A1, imtixaan qeybeedka aqoonta guud la xiriira, waxaad adeegsaneysaa aqoontaada si aad u tilmaantid, una sharraxdid xiriirka ka dhexeeya ee cilmiga sayniska la xiriira. *Imtixaan qeybeedka A2*waxaad adeegsaneysaa aqoontaada bayoolojiga, fiisikiska ama kimistariga si aad u hubisid macluumaad, xiriir u sameysid, meelna iska taagtid arrin taabanaya caafimaad, tamar, farsamo, bey'o, isticmaalka dabiicada iyo raagidda waxyaabaha cilmiga noolaha iyo deegaanka la xiriira. *Imtixaan qeybeed A3* waxaad qorsheyneysaa baaritaan. I*mtixaan qeybeedka B*, imtixaanka cilmi tijaabinta la xiriira, waxaa lagu sameynayaa baaritaan, natiijada ayaana wax lagala soo baxayaa.

Joqoraafi, taariikh, cilmiga diimaha ama cilmiga bulshada

Dhammaan ardayda dugsigaagu waxay imtixaan qaran ku sameynayaan isku maaddooyin. Imtixaanka dugsigaaga lagu sameynayo ka uu yahay waxaad ogaaneysaa ku dhawaad seddax usbuuc ka hor waqtiga imtixaanka.

Skolverket

Imtixaan qeybeedka A iyo imtixaan qeybeedka B *waa kuwo qoraal ah* waxaana siyaabo kala duwan loo tijaabinayaa awoodaha lagu tilmaamayo manhajyada waxbarashada ee kala duduwan.

Xaggee macluumaad dheeraad ah laga helaa?

Macluumaad dheeraad ah oo ku aaddan imtixaannada qaran ee maddooyinka waxaa laga helaa barta intarneetka ee Hey'adda dugsiyada

www.skolverket.se/bedomning

Halkaas waxaa sidoo kale laga helaa isku xirayaal tusaale ahaan ku aaddan hawlo shaqo oo imtixaannada ka mid ah.

Hey'adda dugsiyada kala xiriir

nationellaprov@skolverket.se